



HOGHOL

Dooqaadky Af Soomaaligy - Maayky - HOGHOL Soomaali Maay Newsletter
| **Bil'ly - Monthly** |

Walaa Tirooduung ki jero

- Taariikdy Jamaa'atha Baardheere (1-2)
- Doodhis (2)
- Heesty Allow My taawiyaano (2-3)
- Magmaag (3)
- Dhaghanky (3)
- Fatahadda Afgooye (4)
- Manaahijta walbarashoothy Dowladda Federaalky (4)
- Wargiling (4)

Tifaftiry: Abdullahi Sheikh Mahamad

Aasaasy - Founder

Goobty Horumariyoky Afky Maayka (Afmaay Development Center), maay la aasaasy sanadky 2017. Sababty liing aasaasy maaybuwaaha horumariyowky afky ii dhaganky Maayky (Af-Soomaaligy Maayky).

Maay ha dhawaayaanee dhammang dadky ky howling horumariyowky afky-aayow, Af-Maay.

Abdulkadir Abukar Sheikh, Founder Af Maay Development Center (ADC)

Email:

afmaaydevelopmentcenter@gmail.com

Facebook: <https://www.facebook.com/afmaaydevelopment/>

Office: Baidoa, Sheekh , S/Land, Muqdishu i i Örebro, Sweden.



Taariikdy Jamaa'athy Baardheere: Qeebtii 3aad Baardheere Historia=Baardheere History

Sheikh Aly Dhurry: Ulul-Amrihii 2aad (30 sinny 1776-1806) Hooly usu bilaawy Sheikh Ibreeng Hassan Yabarow oofsihithiis ky demby wey hor ing sii wedeey Sheikh Aly Dhurry oo ky mid haayi dadkii asaasiyaaky jameeadda oo safarky dheer hala gali. Markii usu hogaanky ly wareeghy Sheikh Aly Dhurry, wey islamarkiiäba bilaaweey in usu billaariy dhismithy degaanky ii dadky nebbed inskly nooladan isly markaasny ing suuryagaly ind diinty liky fithiyo degaanky i baadiyaa ing dho dhow.

Dad badang oo diing ing gorodaany iya si isdaby roogh eh hang galy diinty islaamka dadkaas oo ky tirsinaayi deggane ing dhow Baardhere i meel eed ingky durugsingby. Tusaaly haang fididdy i saameynty Jameeada Baardheere weyba deertey barry haang illaa 'Barawe' dhinniggy orsy illaa degaanka 'Oombaley oo ky taaly degaangky 'Weejid', dhinniggy tukud amy waqoow bari, degaanky 'Luuq, illaa 'Iimeey'.



Ulumaathy jameeada Baardheere waybaa bilaaweeny mashruu lyky fidiyaaw ky dhaqanky islaamky. Wey qaadidaayeen dhar-ed, sida qamiis ama shaati-dheer. Bilaangty kufaa galathaasy (luga-gashi), sidaas datiyee dadky jameeada weyba liing kasaayey Ubeereey/ambuurey/Ibeereey.

Markii jameeada billaarity diing i deegaan haanby wey ha bang beheey dad othow ing araghi maamulky Jameeada oo diidy inii sekaatha xoolaa nool sithy gaala, loothy ii erengky yoonay dallag beeredky sithy misigeedy biyaanoo dhiibang oo Ilaaheey ky waajibiyi.

Dadkaas falkaas suubiyi weyba hormood ing haayey reeroo deggaayaang 'Oombaley'. Oombaley tirtirinti haddy, laking weba ky taaley degaank Weejid ii Tiyeeglow dhatiyo. Reer Oombaley weyba ha weerareena jameeada Baardhere iyo nidaamky ky saleysinaayi diinty islaamk. Saas dartiye Sheikh Aly Dhurry weyba amarey in lyky horseedy dadky duullaanky ky ah. Ku reed wal uis hor fadheedy weybaany oggoladeen inii sekady biyaang, waany ing hogaansyamaan awaamirty jameecada Baardhere. Baardhere wiinaty, maamulshe fidy. Dhul degaameedk liing kasow Dooy, Harqaan iyo Bay way walbaryshy ii ilmy ing weydiisidaayeen baardheere. Sheikh Aly dhurry weyba ulul-amry haayey 30 sinny, reed Ally oofsidy, weyba liky duugey misaajidka jaamaa wiing ee Baardhere reedshey.

Diariying: Omar Abdulqaadir Sh. Abdirahmang

Qeepoo Dooghy/Delar av tal/Parts of speech

Soomaali (Maay tarri - Doo dhis; Maxaa tiri- Naxwe)

Swedish – Grammatik, English Grammar

Gunud (gn)

Haraf omboo harfo maghaagha ama falky reed ku galaayang oo tusaayaang laboodnimy, dheddignimmy omboo ki sugunaashy si.

Tusaaly: Ariirty sooraa aangti, ariiky sooraa aami. Lamatha haraf (ty oo maghy reed ku jerto) iyo (ti fal reed ku jerto) dheddighaa sheeghaayaang. Lamaatha haraf (ky oo maghy reed ku jero) iyo (mi oo fal reed ku jero) lapaa sheeghaayaang. Gunudyaa ki shal ged-disinying Maay tari ii Maxaa tiri. Tusaale Maxaa tiri: Inanta soorbay cuntay, Inanka soorbuu cunay. Meelly Maay tari gunudky dheddiging ku eyi (ti) Maxaa tiri (ta) wu. Meelly gunudky lapoodky ehny ku eyi (ky) maxaa tiri (ka) wu.

Diyaring: Abdullahi Sheikh Mohamed iyo AbdulqadirAbukar sheikh

Soomaali (Maay Hees, Maxaa Hees); Swedish Sång, English Song Hees li maghy bahi ALLOW MY TAAWIYAANO

Timir lang siipi	Titiin apuurythii
Tupaaky doorythii	Tingjhir deediyeey
Wal mytaraas eri	Taleethiis toosingtaa
Amboo may taawiyaasang?	Alloow my taawiyaanoo My taawiyaanoo
Lang tareegsitheey	Tafaashey shal dheeraayi
Taabshey wal ing haaynii	Taleb siyii
Totoomy reed liingku sheenii	Dhib my taabyni Taawiyaasanaa?
Alloow my taawiyaanoo	My taawiyaanoo
Tylaawitheey kii ku dheereethii	Toogoo my_iily eh
Tiitheeyaa jertee	Anyley taliyee
Timirooba liing ku shaltabeey	Tawirtiyeey reebti

Tallooy inis taly
Taleethiis toosyhaa
Alloow my taawiyaanoo

Ay kiing taliyoy diidiii
Amboo may taawiyaasang?
My taawiyaanoo

Tafaa lang luko haayii
Tapir dorrong
Towtow inii eroo
Tarting roor ee gali
Alloow my taawiyaanoo

Tiighaal ee
Tufku ky taagsithy englahaaynii
Shaleedis tukuby
Tawiyaasanaa?!
My taawiyaanoo

Tanaad Lang allyh kyweeleey
Tupaallo galleety eh
Taneghee malib ii sising
Takaniisooy aawow
Taleethiis toosingtaa
Alloow my taawiyaanoo

Taajir eh Koony ing tuughaany
Ing tiirsiyhiing
Too too liing eraan
Tartiib ing aang diidii
Amboo may taawiyaasang?
My taawiyaanoo

Halabuurkii Afyaal Afyaal MUhsing Qaasing "Jaakoole" Abughaalkii Balwadiid Binu Ali

Magmaag (Ordspråk):

Aroor biyi sheenaaw eretiisaa tilmaang eh: Magmaagduung maaybaa sheeghaase ing dadka maddii dhaang omboo aroor ing bahaang ha naghathaang inii yoo biyi wethaang ii ing kale maaybaa luku kaseeyeey erety quuying gaar ahaang maddii hangraabty omboo bilaangty eretiye haki usto haang omboo ashuung maaybaa is araasee iddy walku oominyaa iyoow deersy ha kuurimaasee ha taruupaase haangty omboo ashuungky luthaayaang biyoona blashdhowamaayaane lingaagha haku boothaayaang eretiye quuyimaase, saas haatoow hoo aroorka oor weddo maay dhiyo kortee ing haamoo bershoo si fayle iniing lingahanaayne biyoona haku boothang ama ha dhaafaang lingaagha biyoo tasalshoo la aragho. Sasaa liing arri aroor biyi shenaaw eretiisaa tilmaang eh.

Diyaaring: Omar Abdulqadir Sheikh Abdurahman

Fasiraad: Abdullahi Sheikh Mohamed

Dhaghang (Kultur): Qalabkay beeroo



Salbuky



Birqaab

Diyaaring: Abdullahi Sheikh Mohamed

Dallaghee Soomaalithy apuurithaaso oo hunguri eh maybaa ku mid ahaa Tingjhirty omboo diirty. Tingjhirty may ing shal bahaasee lammy noo oo shal eh Salbuky iyoonaay Birqaab.

Salbukithy meraashee yaryaryiing waana aghaarinyiing meelly Birqaabky meraasheey wiiwiinyiing waana gathuuthinyiing. Lammathy noo tingjhirty eethaa ing na'af' bathanyiing quud ahaang waana seddi biloothaa ki bislaathaayaang liky goosithee.

Afgooye Maliingky gurmine sidii luku filaayii Dowladda Federaalka iyo Kofur Galbeed



Dhibbatitha wili teeginty. Dadkina eethaa ingky dhib qapaang 5ta Luuliyoo ilaa haddy. Umuty Soomaaliyeed isku si hal ing maamulo.

Golaha Samatabixinta Aw-Digil



Midnimada KGS
waa mudnaanta
koowaad.

25/06/2020





Goobty Horumariyowky Afky Maayky
Dooqaadky Af-Maayky



Hogol



Af-Maay Newsletter
Af-Maay Development Center (ADC)
Email: afmaaydevelopmentcenter@gmail.com
Office: Baidoa, Sheekh , S/Land, Muqdishu i Örebro, Sweden

Wargiling:

Dooqaadky Hoghol maaybaa ha dhawaayee walaaghi taly ii fikirid ky saabsing hurmariyoky Afky-Maayky: Haniikily hariir: Qofkii haayo, qoraaly, taariikdy, suugaanty Afky-Maayky, haniingky dir:

Eamil. afmaaydevelopmentcenter@gmail.com

Goobty Horumariyowky Afky- Maayky -
Afmaay Development Center (ADC)

c/o Sydvästsomaliska Riksförbundet I Sverige

Föreningarnas Hus

Slottsgatan 13A, 70361 Örebro, Sverige

Tel. 019-133110

E-mail: sydvast.somaliska@outlook.com

Manhaj Jangjeero

Manaahijta Walbarashootha
Dowladda Federaalky mi dheel-
litiring.

1- Buugaagty Mahaa tirileey ky
qoronyiing

2- Gopolee koofureed afshoo,
taariigdiyoo iyo Dhaghanshoo
ku moqonyiing buugty taariikdy
iyoonaay haang af Soomaalighy
addaala dorruwaa hal sahooy

Wasiir Goodax Jiwaabty usu
Fardowsa siyi huku dhapeeyo

AMDC